




JUMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAJA SHACABKA

QARAAR KU SAABSAN

DHAARINTA IYO DEEQAHU UU XAQ U
YEELANAYO MADAXWEYNIHII 8-AAD EE
SOOMAALIYA
M.NE XASAN SHEEKH MAXAMUUD

Muqdisho, 4^{ta} Maarsio 2017






JUMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAJA SHACABKA

QARAAR KU SAABSAN

DHAARINTA IYO DEEQAHU UU XAQ U
YEELANAYO MADAXWEYNIHII 8-AAD EE
SOOMAALIYA
M.NE XASAN SHEEKH MAXAMUUD

Muqdisho, 4^{ta} Maarsio 2017



Tix: GSH/B-10/006/17
Kalfadhiga: 1-aad
Kulankisa: 2-aad

Taariikh: 4^{ta} Maaro 2017

Qaraar
Golaha Shacabka Soomaaliya
Qodobka 1-aad:

1. Baarlamaanka Federaalka wuxuu si maamuus leh u soo dhoweynaya Madaxweynihii 8-aad ee Soomaaliya M.ne Xasan Sheekh Maxamuud oo muddada xilhayntii loo doortay si buuxda u soo dhamaystiray xilkana banneeyey 8^{dii} Febraayo 2017.
2. M.ne Xasan Sheekh Maxamuud wuxuu noqonaya Xildhibaan Golaha Shacabka Soomaaliya inta uu nool yahay xilkana loo dhaariyey 04/03/2017 si waafaqsan Qodobka 64-aad Faqradijsa 4-aad ee Dastuurka Federaalka. Saa daraadeed tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka waa Laba Boqol Toddobaatan iyo Lix (276) Xildhibaan.

Qodobka 2-aad:

Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxaa la faraya in Gunno bileedka iyo deeqaha kale uu maamuus ahaan xaq u yeelanayo Madaxweynihii hore Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya M.ne Xasan Sheekh Maxamuud ku fuliyaan qaraarka Golaha Wasiirada lagu meel mariyo Xeer Madaxweyne.

Qodobka 3-aad:

Qaraarkani wuxuuna hirgelayaa marka uu saxiyo Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaas Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaad"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

